# Guddiga Xuquuqda Aadanaha Australia

## waxay u shaqaynayaan in mujtamaca Australian ay ahaadaan kuwa ilaaliya, ixtiraama, dhiirigeliya xuquuqda aadanaha

## Yaanu nahay

Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Australia waxaa la asaasay 1986 waxaana lagu asaasay xeer ka yimid Baarlamaanka Dawlada Dhexe.

Waxaanu nahay urur-sharciyeed madax banaan oo awood leh waxaanuna warbixinta u gudbinaa Baarlamaanka Federaalka iyadoo la sii marinayo Xeer Ilaaliyaha guud.

## Qaabka aan u dhisanahay

Guddigu waa hayád madaxbanaan oo ka kooban Guddoomiye iyo shan xubnood. Shanta xubnood waxaa hadda haya saddex qof.

**Mudane Catherine Branson QC'**
Guddoomiye iyo Xubinta Xuquuqda Aadanaha

**Mr Mick Gooda**
Xubinta Cadaalada Bulshada oo Aboriginalka iyo Torres Strait Islander

**Mr Graeme Innes AM**
Xubinta Xuquuqda Aadanaha iyo Xubinta Takoorida Jinsiga

**Elizabeth Broderick**
Xubinta masuulka ka ah Takoorida Sinjiga iyo Xubinta masuulka ah Takoorida Da'da.

## Waxaan qabano

Masuuliyada Guddiga waxaa ka mid ah:

- Waxbarashada iyo wacyigelinta dadweynaha
- Takoorida iyo dacwadaha xuquuqda aadanaha
- Raacida xuquuqda aadanaha
- Horumarinta sharciga iyo nadaamka

Waxaan samaynaa sidaan:

- Annagoo xalinayna dacwada takoorida ama jebinta xuquuqda aadanha sida waafaqsan sharciyada xuquuqda aadanaha
- Annagoo dadka weydiinayna arrimaha muhiimka u ah qaranka, sida xoog kaga qaadida dadka asaliga ah qoysaskooda iyo xuquuqda carruurta ku jirta xarumaha ii-hayda ee immigarayshanka
- Annagoo horumarinaynaa barnaamijyada waxbarashada ee xuquuqda aadanaha iyo macluumaadka dugsiyada, goobaha shaqada iyo bulshada
- Annagoo bixinayna talo si loo caawimo maxkamadaha xaallaadaha khuseeya mabaadiida xuquuqda aadanaha
- Annagoo bixinayna talo iyo caawimo si horay loogu mariyo in baarlamaanada iyo dawlada si sameeyo sharciyo, barnaamijyo iyo nadaamyo la raaco.
- Annagoo fulinayna lana xiriirinayna cilmi baarista xuquuqda aadanaha iyo arrimaha takoorida.

## Sharciga

Guddiga soo socdaa waxay masuul ka yihiin maamulida sharciga federaalka:

- Xeerka Takoorida Da'da ee 2004
- *Xeerka Takoorida jinsiyada ee 1975*
- *Xeerka Takoorida Sinjiga ee 1984*
- *Xeerka Takoorida Iinta ee 1992*
- *Xeerka Guddiga Xuquuqda Aadanaha Australia ee 1986*

Guddigu waxay iyaguna leeyihiin masuuliyaad sida waafaqsan:

- *Xeerka Native Title Act 1993*, oo ka warbixinaya waxqabadka iyo qanacsanaanta xuquuqdooda Aadanaha ee dadka Asaliga ah wixii khuseeya xaqa muwaadinimada (waxaa qabteen Xubinta Takoorida sinjiga naha Cadaalada Bulshada ee dadka Aboriginiska and Torres Strait Islander-ka )

- *Xeerka Cilaaqaadka Goobta Shaqada ee 1996*, wixii khuseeya abaalmaarinta federaalka iyo u-sinaanta mushaharada (waxaa qabtay Xubnaha Takoorida Sinjiga).

## Dacwooyinka

Xeerka Takoorida Da'da, Xeerka Takoorida Iinta, iyo Xeerka Takoorida Sinjigu waxay dhamaantood ku salaysan yihiin cahdiyada xuquuqda aadanaha ee Australia gashay iyo heshiisyaday ansixisay. Sharciyadaani waxay ka xafidaan in la takooro ama in lagu hagardaameeyo goobaha shaqada iyo nolosha guud ee kale, iyadoo ku salaysan da'dooda, sinsijiyadooda, midabkooda meeshay ka soo jeedaan ama wadankooda ama asalka qawmiyadooda, uurka, xaalka guurka ama iinta.

Dadku waxay u gudbin karaan Guddiga dacwooyinka la xiriira takoorida. Dacwada marka ugu horreeya way qiimaynayaan si loon xaqiijiyo in la baari karo sharci ahaan sida waafqsan sharciga guddigu masuulka ka yahay. Dabadeed dacwada dib ayaa loo eegaa haddii ay dhexdhexaadin ku haboon tahay ama haddii la iska tuuri lahaa.

Heshiisku waa hab ay guddigu isugu keenaan qaybaha – qofka dacwada samaynaya iyo qofka ama ururka ay dacwadu ka soo horjeedo – si loo xaliyo arrinta. Heshiisiintu waa hab qarsoodi ah kaas oo labada dhinacba lagu siinayo fursada lagala hadlo arrimaha goáana looga gaaro. Dacwooyin badan ayaa si wanaagsan lo dhameeyaa.

Haddii dacwad aan wax laga qaban karin, Guddoomiyaha ayaa xiraya dacwadaas. Qofka dacwada wata ayaa arrinta Maxkamada Federaalka Australia ama Adeega Magistrate-ka si go'aan looga gaaro. Guddigu wuxuu kaloo baaraa dawcwada takoorida xagga shaqada, iyo jebinta xuquuqda Aadanaha iyo xeerka Guddiga u sinaanta.

Sharcigani wuxuu daboollaa:

- Ku xadgudbida la sheegay oo xuquuqda Aadanaha ee Dawlada Dhexe (sida Waaxda Dawlada ee Federaalka ah) oo ka soo horjeeda heerarka la aqbalay ee caalamka
- Takoorida shaqada oo siyaalla badan u dhacda sida diinta, nooca rabitaanka galmoodka, aragtida siyaasadeed, xarakaadka ururka shaqaalaha iyo diiwaanka dembiga.

Dacwooyinka ku yimid sida waafaqsan Xeerkaan ayaa iyadana lagu xalin karaa wada hadal u dhexeeya qaybaha is haya. Haddii dacwada aan la dhamayn karin, oo aanay u joogsan sababa kale oo sharciga lagu xusay, guddiga ayaa markaas ka dib u gudbin doonaa warbixin Baarlamaanka Federaalka isagoo ku nuuxnuuxsanaya arrimaha ugu waaweyn iyo wixii talo ah oo lagau xalinayo dacwada. Dacwooyinkaasi ma ay laha waxyaalla sharci ahaan lagu meelmarin karo.

## Waxbarasho iyo Wacyigelin

Mid ka mid ah hawlaha asalka u ah Guddigu waa inay dadka la socodsiiyaan wixii ku saabsan xuquuqda aadanaha Australia gudaheeda – laga bilaabo dugsiyada, ganacsiga, warshadaha, kooxaha bulshada ilaa dawlada. dadaalkaas waxaa ku jira kor u qaadida ogaanshaha dadku ogyihiin xuquuqdooda iyo masuuliyadooda sida waafaqsan sharciyada lidka-takoorida ee dawlada federaalka ah.

Fariinta ugu weyn ee dhamaan barnaamijyadeeda waxbarashadu waa ciribtirida takoorida iyo hagardaamada waxayna muhiim u tahay in la xaqiijiyo bulsho siman oo dulqaad leh, taas oo dhamaan dadka Australianka ahi ku raaxaysan karaan xuquuqdooda.

Si loo gaaro dadka ugu badan oo la gaari karo, guddigu:

- Waxay la shaqeeyaan macalimiinta iyo ardada, si horay loogu mariyo unugyo waxbarasho oo la xiriira manhajka iyagoo isticmaalaya on-line-ka, CD-ROM iyo macluumaadka DVD-ga

- Waxay la shaqeeyaan shaqaalaha, si loo siiyo macluumaad iyo xog si hoos loogu dhigo takoorida iyo hagardaamada ka jirta shaqada
- Waxay la shaqeeyaan kooxaha bulshada, si ay siiyaan bulshada macluumaad iyo xog si ay uga caawinto shaqadooda
- Waxay la sahqeeyaan xubnaha mihnad layaasha sharciga, iyagoo qabanaya siminaaro waxna qoraya si kor loogu qaado arrimaha sharciga ee xuquuqda aadanaha
- Waxay martigeliyaan shirar iyo munaasabado, sida biladaha Xuquuqda Aadanaha iyo xaflada abaalmarinta.

Guddoomiyaha iyo xubnuhu waxay hawlgeliyaan mar kasta oo ay suurtagal tahay warbaahinta, si kor loogu qaado loogana doodo xuquuqda aadanaha muhiimka ah iyo arrimaha takoorida.

Guddigu wuxuu leeyahay websayt si sahala loo isticmaali karo kuwaas oo ay ku jiraan macluumaad iyo xogaha shakhsiyaadka, dugsiyada, loo shaqeeyaha iyo kooxaha bulshada.

## Faahfaahinta meelaha lagala xiriiro

**Cinwaanka wadada**: Level 8, Piccadilly Tower
133 Castlereagh Street
Sydney NSW 2000

**Cinwaanka boostada**: GPO Box 5218
Sydney NSW 2001

**Tel:** (02) 9284 9600 ama 1300 369 711
**Fakis:** (02) 9284 9611
**TTY**: 1800 620 241

**Websaytka:** www.humanrights.gov.au
Email: paffairs@humanrights.gov.au
**Qoraallada**: 1300 369 711 ama www.humanrights.gov.au/about/publications

Dacwooyinka Adeega Cidda lala xiriirayo

**Dacwooyinka Infoline**: 1300 656 419

Email-ka dacwooyinka: Complaintsinfo@humanrights.gov.au

**Macluumaadka dacwooyinka la hello iyagoo online ah** :
www.humanrights.gov.au/complaints_information
Macluumaadka Luqadaha kaleeto:
www.humanrights.gov.au/about/languages/